

Heerarka mushaharka ee ugu yar

Dhaqan gelay laga bilaabo Jan. 1, 2024

HEERKA MUSHAHARKA

Loo shaqeeyaha weyn – Shirkad kasta oo dakhligedu guud yahay \$500,000 ama ka badanyahay sannadkii

\$10.85/saacaddii

Loo shaqeeyaha weyn – Shirkad kasta oo dakhligedu guud ka yaryahay \$500,000 sannadkii

\$8.85saacaddii

Mushaharka tababarka – Waxaa la siin karaa shaqaalaha da'doodu tahay 18 iyo 19 90ka maalmood ee ugu horreeya ee shaqada

Mushaharka dhalinyarada – Waxa la siin karaa shaqaalaha da'doodu tahay 17 ama ka yartahay

Fiisaha J-1 – Waxa la siin karaa shaqaalaha huteelada, moteellada, xarumaha la seexdo iyo goobaha dalxiiska ee ka shaqeeya xoogaga shaqada ee xagaaga, socdaalka Booqdaha Isweydaarsiga (J) fiisaha aan muhaajiriinta ahayn



dli.mn.gov/minwage

SAACADAHA DHEERAADKA AH (OVERTIME)

Mushaharka saacaddii iyo barkeed ee mushaharka caadiga ah ee shaqaalaha

Loo-shaqeeyayaasha yaryar ama gobolku caymiyo

Wixii ka badan **48** saacadood

Loo shaqeeyayaasha waaweyn iyo kuwa dawladda dhexe caymiso

Wixii ka badan **40** saacadood

WAKHTIGA JIRRADA IYO BADBAADADA

Wakhtiga jirrada iyo badbaadada waa wakhti fasax lacag leh oo loo-shaqeeyayaashu ay tahay inay siiyaan shaqaalaha Minnesota taas oo loo isticmaali karo sababo gaar ah, oo ay ku jiraan marka uu shaqaaluhu buko, si uu u daryeelo xubin qoyska ka mid ah ama si ay u raadsadaan caawimo haddii shaqaale ama xubin qoyskooda ah ay la kulmeen xadgudubka guriga.

Shaqaaluhu waxa uu kasbadaa hal saac oo wakhtiga jirrada badbaada ah 30kii saacadood ee kasta oo uu shaqeeyo oo waxa uu heli karaa ugu badnaan 48 saacadood sannad kasta aan ka ahayn haddii loo shaqeeyuhu uu ogolaado lacag ka badan.



dli.mn.gov/sick-leave

AARGOOSIGU WAA MAMNUUC

Loo shaqeeyuhu ma sii dayn karo, ma anshaxmarin karo, ma ciqaabi karo, ma faragelin karo, uma hanjabi karo, ma xakamayn karo, kuma qasbi karo, ama haddii kale kama aargoosan karo ama takoori karo shaqaalaha wixii ku saabsan magdhowga shaqaalaha, shuruudaha, xaaladaha, goobta ama mudnaanta shaqada sababta oo ah shaqaaluhu wuxuu ka warbixiyey ku xadgudubka sharci ama diiday inuu ka qaybqaato hawl uu shaqaaluhu og yahay inay xadgudub ku tahay sharciga.



DEPARTMENT OF
LABOR AND INDUSTRY

651-284-5075 • 800-342-5354 • dli.laborstandards@state.mn.us • dli.mn.gov/minwage

Sharciga ayaa u baahan in ogeysiiskan lagu soo dhajiyo meel ay shaqaaluhu si fudud uga arki karaan. Oktoobar 2023